بسم الله الرحمن الرحيم

# ***FIRST DRAFT TO BE REVIEWED AND UPDATED***

## 1. ***ARAR : INTRODUCTION***

*Ugu horreyntii waxaa loo baahan yahay in la fahmo Ha'yadda Qaranka ee la yiraahdo BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIA "CENTTAL BANK OF SOMALIA). Hay'addaan waxaa lagu dhisay Sharcia Lr. 27 taarrikhdu markay ahay Nofeembar 26, 1968, waxayna ka madax bannaan tahay Hay'adaha Dawladda oo idil, maxaa yeelay waa Khasnajiga Qaranka Soomaaliyeed, waxayna u xil saaran tahay inay ilaaliso Qiimaha Lacagta Qaranka ee Shilin Soomaaliga iyo Sicir Bararka. Sannad kasta markii la xisaab xiro Bankiga wuxuu Qaranka siiyaa 50% ee faaiidadiisa, inta kalena oo ah 50% wuxuu ku biiriyaa Lacagta Kaydka (RESERVE ACCOUNT EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA), si loogu daafaco qiimaha Shilin Soomaaliya iyo haddii khasaare uu Bankigu galo inuu ku*

*daboolo, maadaama ay Dawladda wax kaalmo dhaqaale aysan siinaynin maddama uu ka madax bannaan yahay Missaaniyadda Dawladda, waxaana wax ka xusayaa taariikhdu markay ahayd 1968 ayaa lacagta Ingiriiska ee UKPOUND qiimaheeda hoos u dhacday, Bankiguna khasaare weyn ayaa arrintaa ka soo gaartay, wuxuuna ku daboolay Kaydkaas u yaallay, haddii kale Bankigu wuu kici lahaa amba uu xirmi lahaa, wax adduunka ka dhaca ma aysan ahayn.*

*Haddaba, waxaan si kooban uga hadli doonaa Insha'Allah taariikhda Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, taariikhda Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo taariikhda Guryaha Shaqaalaha ee Degmada Wadajir ee Buulo Xuubery, agagaarka Gegida Caalamiga ah ee AUN AADAN CADDE:*

## *2. **TAARIIKHDA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA***

*Bankiga Dhexe ee Soomaaliya wuxuu qoray Shaqaalahii ugu horeeyay sannadka markuu ahaa 1959, iyagoo muddo sannad ah ku soo qaatay tababar Bankiga Dhexe ee Talyaaniga Xaruntiisa Rome (Banca D'Italia - Roma) kadibna waxey shaqo ka bilaabeen Bankigii la oran jiray "CASSA PER LA CIRCOLAZIONE MONETARIA DELLA*

*SOMALIA - Mogadiscio", muddadii ka horreysay Dalkeenna intuusan Xurnimada qaadanin.*

*Markii Xornimada la qaatay waxaa Bankigaas laga beddelay magacaa kor ku xusan, waxaana loo bixiyey "BANCA NAZIONALE SOMALA" (SOMALI NATIONAL BANK), iyadoo Dowladda u magacaawday Mudane Soomaali ah inuu ka noqdo markii ugu horreysay Guddoomiye "President" (AUN CABDI AADAN), balse jagooyinkii kale oo kala ahaa Agaasime Guud, (Director General) Agaasime Guud Ku-Xigeen (Vice Director General) iyo Agaasimeyaal Qaybeed (Directors of Departments) waxaa muddo 10 sano ah hayey Saraakiishii Talyaaniga ahaa ee Bank of Italy iyo 2 Sakaal oo ka yimid Bankiyada Jarmalka Galbeed oo dhalashadoodu ahayd Jarmal.*

*Magaca cusub ee Banca Nazionale Somala waxaa lagu dhisay Xeer Lr.3 ee 30 Juuyo 1960 kadibna noqday Sharci buuxa Lr.2 Taariikh markay ahayd 13kii Jannaayo 1961. Sharcigaas waxaa lagu beddelay Xeer Lr.6 oo soo baxay*

*19kii Oktoobar 1968 oo lagu beddelay Sharciga uu haatan ku shaqeeyo Bankiga Lr. 37 oo soo baxay 26 Nofeembar 1968.*

*Sida ay qorayaan Shuruucda kor ku tifaftiranba, Bankiga wuxuu lahaa Guddi Maamul "BOARD OF DIRECTORS" oo bil kasta laba jeer shiri jiray si ay u hubiyaan habsami-*

*u-socodka hawlihiisa ilaa 21-kii Oktoobar 1969, kaddib markii Xukunka Dalka ay la wareegeen Ciidammada Qalabka Sida. Maamulka Bankiga wuxuu ka madax-bannaanaa faragelin dibadeed, Dawladda ama Hay'ado kaleba, waxayna arrintaasi ku saleysantahay Sharciga lagu dhisay Bankiga. Magacyada Guddigaas Maamulka waxay kala ahaayeen sida hoos ku xusan, iyadoo uu jiray Guddi loogu macag daray "CONTE DEI REVISORI" oo iyagana magacyadooda aan hoos ku xusi doono Insha'Allah:*

## 3. NOMINA DEL CONSIGLIO D'AMMINISTRAZIONE DELLA BANCA NAZIONE SOMALA (DECRETO DEL PRIMO MINISTRO, 24 GIUGNO 1967)

***1) Hagi Mohamud Abdulla Dirir;***

***2) Muse Mahdi;***

***3) Giama Hassan Kalaf;***

***4) Seek Modoue Mohamed;***

***5) Hagi Mohamed Hassan;***

***6) Ali Mohamed Farah;***

***7) Seek Abdullahi Seek Ibrahim;***

***8) Ahmed Hagi Abdullahi «Hashish»;***

*9) Abdi Dahir Farah;*

*10) Hagi Elmi Samantar;*

*11) Hagi Dahir Elmi;*

*12) Scerif Omar Scerif Abo;*

*13) Abdullahi Mo1amed Said.*

## ***4. NOMINA DEL CONSIGLIO DEI REVISORI DEI CONTI DELLA BANCA NAZIONE SOMALA (DECRETO DEL PRIMO MINISTRO, 1 AGOSTO 1967)***

1. ***B.U. N.8 DECRETO DEL PRIMO MINISTRO 8 Luglio 1967, n. 139. Nomina dei component del Consiglio dei Revisori dei Conti della Banca Nazionale Somala. TKH. 1 Agosto 1967 Nomina di Collegio dei Revisori della Banca Nawionale Somala Sono nominati Membri del Collegio dei Revisori della Banc&. Nazionale Somala i Signori:***

***1. Hagi Iahia Hagi Abdullahi - Presidente;***

***2. Ali Issa Farah - Membro effettivo;***

***3. Mohamud Abdi Arraleh - Membro effettivo;***

***4. Osman Abucar Mahdi - Membro supplente;***

***5. Geilani Malak - Membro Supplente.***

*Sida la ogsoon yahay, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya wuxuu Shaqaalihiisa ku xulan jiray tartan ku saleysan Imtixaan, isagoo ku soo baafiyo Jaraa'idka Dalka kana baahiya Idaacadaha. Bankiga wuxuu Hay'adaha kale ee Dawladda kaga tilmaamanaa xulashada Shaqaalihiisa, isagoo qaadan jiray markastaba kuwa ugu aqoon badan, muddada u dhaxeysay 1959 ilaa iyo sannadka markuu ahaa 1968. Imtixaannada waxaa qaadi jiray Khubaro Talyaani ah iyo Wasaaradda Waxbarashada Macallimiinta ugu aqoon badan, si loo helo shaqaale tayadoodu tacliineed heer sare tahay, kaddibna si ay ugu sahlanaato Maamulka Bankiga inuu muddo gaaban ku tababaro Shaqaalihiisa.*

*Jaangooyadaas adag ayaa waxay abuurtay in muddo 10 sano ah "1960-1970" Shaqaalaha Bankiga Dhexe ay noqdaan kuwa si sahlan u hanta kala wareegidda xilalka ay hayeen Saraakiishii Talyaaniga oo Bankiga Dhexe ka ahaan jiray Agaasime Guud, (Director General), Agaasime Guud Ku-Xigeen (Vice Director General) iyo Agaasimeyaal Qaybeed (Directors of Departments*

*Waxaa xusid mudan in markii uu kacay bankigii la oran jiray "SOMALI CREDIT BANK amba CREDITO*

*SOMALO" sannadka markuu ahaa 1968, waxaa la wareegay Khasaarihiisa oo idil (LOSSES) iyo Shaqaalihiisaba, oo aqoontooda aad iyo aad u hooseysay, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, arrintaasna waxaa taabbageliyey Saraakiisha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya. Isla sannadkaas 1968 waxaa la abuuray bankiga haatanba jira oo lagu magacaabo Bankiga Horumarinta Soomaalida, "SOMALI DEVELOPMENT BANK". Aasaaska bankigaan iyo saani u hawl-gelintiisaba waxaa dhaqan geliyey Saraakiisha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya. (Eeg Sharci Lr. 2 ee 28 Febbaraayo 1968).*

*Waxaa kale oo marag ma doonto ah, markii Dawladdii Militariga ahayd ay ku dhawaaqday qarameynta bankiyadii ajaanibta oo kala ahaa Banco di Roma, Muqdisho iyo labadiisa laamood ee Marka iyo Kismaayo, Banco di Napoli Muqdisho iyo Laantiisa Kismaayo , National and Grindlays Bank Ltd, Laamihiisa, Hargeysa, iyo Berbera, iyo ugu dambeyntii Banque de Port Said Muqdisho, waxaa taabbageliyey Madaxna ka noqday Saraakiisha Bankiga Dhexe.*

*Qaraneyntii bankiyada ajaanibta waxay abuurtay labadii Banki oo la kala dhihi jiray BANKIGA GANACSIGA SOOMALIYEED iyo BANKIGA GANACSIGA IYO KEYDKA SOOMAALIYEED, labadooduba waxaa taabbageliyey Shaqaalihii iyo Saraakiishii Bankiga Dhexe*

*ee Soomaaliya, iyagoo weliba ka nqday Madaxda Sare ee labadaas banki.*



Guddoomiyaha Bankiga Qaranka Cabdi Adan oo siinaya Madaxweyne Adan Cabdullahi Cusmaan nuqulkii u horeeyey ee Warbixin Sanadeedkii Bankiga Qaranka Soomaliyeed (Bankiga Dhexe) ee Luulyo 1960 - 1961. Madaxweyaha waxaa wehilyey oo la socday R/W Abdirashiid Cali Sharmarke & Wasiirka Maaliyada Cabdulqadir Maxamed Aadan Zope.

# 5. ***GUDDOOMIYEYAASHII SOO MARAY BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA – 1960 - 1990***

| | |
|---|---|
| ***1. DR. ABDI ADEN MOHAMED*** | ***1960 – 2964*** |
| ***2. MR. SHEIKH ABDI HAGI ABIKAR*** | ***1964 – 2968*** |
| ***3. DR. ABDULLAHI AHMED ADDOW*** | ***1968 – 1969*** |
| ***4. DR. CABDIRAXMAAN NUUR XIRSI*** | ***1970 - 1974*** |
| ***5.. DR. OMAR AHMED OMAR 1ST TIME*** | ***1975 – 1978*** |
| ***6. DR. MOHAMUD JAMA AHMED*** | ***1978 – 1984*** |
| ***7. DR. OMAR AHMED OMAR 2-ND TIME*** | ***1985 – 1987*** |
| ***8. MR. MOHAMUD MOHAMED MOHAMUD*** | ***1987 – 1989*** |
| ***9. DR. OMAR AHMED OMAR 3-RD TIME*** | ***1989 – 1990*** |
| ***10. MR. ALI ABDI AMALOW*** | ***NOV.DEC.1990*** |

## *6. TAARIIKHDA SHAQAALAHA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA IYO GUYRAHA DEGMADA WADAJIR EE BUULO XUUBEY*

*Waxaa dow ahaan illa soo gudboonaatay inaan xog ogaal uga dhigo Shacabka Soomaaliyeed iyo Golayaasha Baarlamaanka iyo Senaterrada warbixin tifaftiran oo la xiriirta taariikhda Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, iyadoo aysan shaki iiga jirin inaad xog ogaal u tihiin arrimaha waayahaan dambe ka aloosan Guryaha Shaqaalaha ee ku yaalla Degmada Wadajir, agagaarka Gegida Diyaaradaha AADAN CABDULLE CISMAAN, balse waxaan uga golleeyahay is-xusuusin, maadaama aan anigu ka wakiil ahay 52 (Konton iyo Laba Qoys) oo soomaali ah ay si Sharci ah iigu wakiisheen inaan xuquuqdooda la xiriirta guryahaas aan u daafaco, iyagoo i siiyey Wakaalada Buuxda (POWER OF ATTORNEY) oo laga soo tasdiiqiyey Notaayo la aqoonsan yahay ee Dalka Gudahiisa iyo Dibeddiisaba.*



*Sawirkaan waa Shaqaalihii ugu horreeyey oo uu Bankiga qorto, kaddib markay imtixaan adag ku soo guuleysteen, waxaana loo diray tababar sannad ah ee Dalka Talyaaniga Magaalada Roma ee Banca D'Italia sannadka markuu*

*ahaa 1959-1960 si ay ula kowsadaan shaqada Bankiga oo markaas la dhihi jiray BANCA NAZIONALE SOMALIA "SOMALI NATIONAL BANK", waana kuwa kala wareegay xilka Shaqaalihii Banca D'Italia oo ahaa kuwa maamulayey Bankiga ilaa iyo 1970.*



*Sawirkaan wuxuu isagana tilmaamayaa Shaqaalihii Banca D'Italia oo lagala wareegay xilka, iyadoo Shaqaalaha Soomaaliyeed si hufan iyo xilkasnimo ku dheehan tahay masuuliyaddaa culus ula wareegay kana qabtay Bankiga xilal kala duwan, ayaga iyo kuwii ka dambeeyayba ilaa iyo Burburkii Dalkeenna.*

## 7. *GLI ITALIANI CHE HANNO LAVORATO PRESSO LA BANCA NAZIONALE SOMALA*

***1. FRANCESCO PALAMINGHI CRISPI***
***Direttore Generale***
***2. GIUSEPPE MORASCA***
***Direttore Generale***
***3. EMILIO GIANNINI***
***Vice Direttore General***
***4. TULLIO PETROLININ***
***Capo Dipartimento Prestiti***
***5. CAPUTO***
***Capo Ufficio Contabilita"***
***6. GERARDO PIETRO MARIANGELI***
***Contabile***
***Contabile***
***7. PELOTTI***
***MARCO VECCHI***
***Conti Correnti***
***8. SCOTTO DI FAZZANO***
***Capo Ufficio Cassa Banca***
***9. CIATTINO***
***10. Cassiere Sportellista***
***11. VINCENZO VISMARA***
***Adetto Conti Correnti "MACCHINA AUDIT"***



*Sawirkaan wuxuu isagana tilmaamayaa Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya sida ay isugu xirnaayeen, iyadoo aanan loo kala soocin xil ama darajo balse oo ay ahaayeen keliya Shaqaale hal meel ka wada shaqeeya oo imtixaan adag ku soo galay shaqada. Sawirkaan waxaa la qaaday 1968. Shaqaalaha markii la guddoonsiiyo warqadda lagu shaqaaleysiiyey, waxaa ku lammaansanayd 2 (labo) buug oo tifaftireyso xuquuqda uu Bankigu ku leeyahay iyo xuquuqda ay iyaga Bankiga ku leeyihiin oo haddii aadan soo saxiixin labadaas buug adiga shaqada ma bilaabi kartid, (REGOLAMENTO PER IL PERSONALE & REGOLAMENTO PER QUIESCIENZA.*

*Labadaas heshiis waxay dhaqan galeen sannadku markuu ahaa 1963, kaddiib markii afti laga qaaday Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee markaas ka shaqeynayey Bankiga. Markaas wixii ka dambeeyay shaqaalaha cusub uu Bankiga sannad kasta qaadan jiray, ka dib markii ay soo gudbaan imtixaan adag, waxaa laga saxixi jiray labada heshiis oo kor ku xusan, kaddib markay oggolaansho ahaan u soo saxiixaan. Hay'ad Dowladeed "Wasaarado, Wakaalado, Warshado" oo nidaamkas oo kale lahaa ma ayan jirin oo arrintaas oo kale ma jirin, taasina waxay caddeyneysaa sida uu Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya uga duwan yahay Shaqaalaha Dawladda oo idil.*



*Sawirkaan wuxuu tilmaamayaa Carruurtii ku dhalatay Guryaha Shaqaalaha ee Degmada Wadajir ee Buulo Xuubey, agagaarka Gegida Caalamiga ah ee AUN AADAN CADDE oo haatan xaasas iyo carruurba leh.*

## *8. TAARIIKHDA GURYAHA SHAQAALAHA EE DEGMADA WADAJIR*

*Sida ku xusan Sharciga Lr. 132 EE SOO BAXAY 29-KII ABRIILE 1971 BOLLETTINO UFFICIALE SUPPL. N.4 AL N.5 ee 18-kii Maajo 1971 ayaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ka codsaday dhul Demanio (Appezzamento di terreno demaniale ah oo cabbirkiisu yahay 154.000 mq, si uu uga dhiso 138 guri oo ay Shaqaalaha degaan, iyadoo lacagta lagu iibiyey dhulkaas uu Bankigu u isticmaalay lacagta kaydka ah ee Shaqaalaha, loona yaqaan PENSION FUND, lacagtaas oo Bankiga markaad fiirisid xisaabihiisa ku xusan dhanka LIABILITIES ee ma aha ASSET uu bankiga leeyahay, waxaan laga arki karaa Sharciga ku daabacan Faafinta Rasmiga ah ee sannadihii 1967 – 1969.*

## *MIITAAL AHAAN*

***B1ollettino Ufficiale NO.Suppl N. 2 al N.3 TKH. 12 Dicember 1969 oo caddeyneysa in Lacagta Hawlgabka ah ee Shaqaalaha uu Bankigu ku yahay QAAN (LIABILITY)***

*Guryaha Shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee ku yaalla Degmada Wadajir, agagaarka garoonka diyaaradaha Aadan Cabdulle Cusmaan, waxey hadda ka kooban yihiin 54 guri waxaana qaybtii ugu horeysay oo aheyd 22 guri la dhisay 1965, shaqaalihii ugu horeeyayna waxey degeen bishii Febraayo 1966dii, iyadoo waagaas aaggaas lagu tilmaami jiray CAMPO BOTTEGO.*

*Waxaa xusid mudan in Maamulka Sare Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee midka haatan ka jira ka horreeyey uusan awood sharci u lahayn inuu beddelo ama burriyo go'aankii uu gaaray guddigii (Board of Directors) oo jiray sannadihii 60-maadka kaasoo go'aamiyay in shaqaalaha Bankiga Dhexe guryo loo dhiso iyadoo muhimadda ugu weyn ay ahayd in Shaqaalaha aysan ka tegin Bankiga, dhiirri gelin ahaanna la taabsiiyo inuu Bankiga joogitaankooda ku abaal mariyo Hooy ay degaan; waana wuxuu Maamulka Sare ee Bankiga uga duwanaa Hay'adaha kale ee Dawladda qiimeynta uu qiimeynayey Shaqaalihiisa.*

*Haddaba, iyadoo laga duulayo mabda'aas ayaa Maamulkii Talyaaniga waagaas hayey Bankiga Dhexe uu u sameeyey guryahaas Heshiis ku saleysan KIREYSO OO YEELO (RENT TO OWN SYSTEM), iyadoo hesiikaas lagu saleeyey in aakhiritaanka Milkiyadda Guryahaas lagu wareejiyo Shaqaalihii muteysta oo Shaqada ku gaara*

*Hawl-Gab. Sidaas darteed, hantida lagu dhisay guryahaas waxay ahayd lacagta laga jaro mushaharkooda "Pension Fund" oo loogu tala galay in Shaqaalahaas ay qaataan markii ay Hawl Gab noqdaan sida ku cad heshiiska 1966, waxaa saldhig looga dhigay ijaarka Shaqaalaha laga qaadayo inuu yahay habka loo yaqaanno "kireyso oo yeelo" (RENT TO OWN SYSTEM), oo ahaa Sh.So. 290.00 bil kasta. Heshiiskaas waxaa lagu qoray luqadda Talyaaniga oo waqtigaas ahayd Luqadda Rasmiga ah "OFFICIAL LANGUAGE" ee Dalka uu ku dhaqmayey intaanan la hirgelinin far Soomaaliga sannadka markuu ahaa 1972.*

*Sidaas darteed, maadaama waqtigan xaadirka ah ay yaryihiin Somaali taqaanna Luqadda Talyaaniga ayaa waxaan door bidnay inaan Dalka Talyaaniga ka soo sameyno tarjumaad Luqadda Ingiriiska oo laga soo Sharciyeeyey Maxkamad ku taalla Magaalada Torino ee Gobolka Piemonte ee Dalka Talyaaniga.*

*Waxaa marnaba dood geli karin in Madaxda Sare ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya haatan joogta amba kuwa kale oo imaan kara mustaqbalka ku saleysan aysan Sharci u lahayn in guryahaas ay iibiyaan, maxaa yeelay milkiyaddooda waxaa Sharci ahaan u leh shaqaalaha muddada dheer deggenaa bilwalbana laga jari jiray haaftooyinkii lagu milkin lahaa guryahaas, sida uu dhigayo*

*heshiiskii (Contract) ay la galeen Bankiga, iyo xeerkii lagu maamulayay guryaha shaqaalaha.*

*Haddaba waxaan caddeyn karnaa in Bankiga uu ka qaatay Saraakiisha Guryaha deggen lacag ka badan intii lagu heshiiyey amba laba u jibbaar ah halkii guryaha qiimahooda ahaa Sh.So. 45.000, halkii uu ku wareejin lahaa milkiyaddana ee dafiray, isagoo jabiyey heshiiska kor ku xusan.*

*Waagaas lacagta kor ku xusan waxaa lagu dhisan karay amba lagu iibsan karay 2 guri oo noocaas oo kale ah (Villa), balse Shaqaalaha waxay door bideen, maadaama uu Bankiga u oggolaa inay haftooyin ku bixiyaan Milkiyadda Guryahaas, iyadoo weliba ay jireen Shaqaale diiday inay qaataan guryahaas 1966.*

*Waxaa kale ee loo baahan yahay in la xuso in Bankiga Dhexe ee Soomaaliya codsi qoraal ah u diray Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahaana Duqa Magaalada Muqdisho Mudane Muungaab waqtigiisii si dokumintiga milkiyadda ee dulalaka DEMANIALE oo loo yaqaanno VERBALE DI CONSEGNA dib ugu soo sameeyo si loogu wareejiyo Shaqaalaha,* ***sida ku xusna Warqadda Gov.10/083/2014 ee ku taariikheysan 30 Maarso 2014*** *balse arrinta ilaa iyo haatan waxaba kama hirgelin.*

## ***9. <u>HADDABA MAXAA KEENAY IN LABO DACWO LAGU OOGO BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA. MID IDAARI AH IYO MID MADANI AH?</u>***

*Annagoo fileyno inaan Bankiga uu Milkiyadda Guryaheenna oo aan wada bixinnay iyo in ka badanba, sidii lagu heshiiyey 1-dii Febbaraayo 1966 ayaan waxaan Bankiga si qoraal ah noo soo gaarsiiyey warqadda Lr. GOV.-10/274/ 2015 taariikhdu markay ahay 30-kii Sebteembar 2015.*
***<u>(Warqadda Lr. GOV.-10/274/ 2015 oo uu Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Mudane Bashiir Ciise Ali u qoray milkiileyaasha guryaha shaqaalaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya – Degmada Wadajir Tkh. 30/09/2015).</u>***

*Markii warqaddaas aan helnay, ayaan aniga u safray Xamar, si aan u xusuusiyo Madaxdii kuwa haatan jooga ka horreysay in qoraalkaas uusan ku saleysnayn xogta Guryaha, waxayna igu qaadatay muddo bil ah (30 Maalmood), kaddib markii ay iga qanci waayeen ayaan la*

*xiriiray ugu horreyntii Madaxweyne Xasan Sheikh Maxamuud, iyadoo aan la kulmay 2 jeer oo aan markii 1-aad gaarsiiyey warbixin waafi ah xaqiiqda Guryahaas, markii labaadna waxaan guddoonsiiyey buug ay ku xusan yihiin dokumentiga caddeynaya in guryaha uusan lahayn Bankiga Dhexe, balse milkiyadda ay leeyihiin Shaqaalaha Guryahaas deggen oo xaq la taaban karo u hantidaas u leh, balse Mudan Xasan arrintaas waxba kama qabanin.*

*Kaddib waxaan ballan ka qaatay Guddoomiyaha Baarlamaanka oo markaas xilka Baarlamaanka hayey Mudane MAXAMED CISMAAN JAWAARI, balse markii ballantii aan ugu tagay Xafiiskiisa oo aan sugayey muddo 3 (Saddex) saacadood ayuu xogtiisa iigu soo faray inaan buugga aan isagana u diyaariyey oo ay ku xusnaayeyy dokumentiga caddeynaya in hantida guryahaa ay leeyihiin Shaqaalaha deggeen ugu dhiibo Xoghayntiisa, balse ballantii uu qaaday oo ahayd inuu kaddib markuu akhristo buugaas uu ballan kale ii soo qaban doono, ma uusan oofinin, mana ahayn wax aan ka filayey Masuul heerkaas jooga inuu cabashada shacabka iska dhega tirayo.*

*Markaas kaddib waxaan la kulmay Ra’iisul Wasaaraha waagaas xilka hayey oo ahaa Mudane Cumar Cabdirashiid oo isagana aan guddoonsiiyey buug ay ku xusan yihiin dokumentiga caddeynaya in guryahaas milkiyaddooda ay leeyihiin shaqaalaha deggen, balse isaga wuxuu iigu jawaabay, qolada Bankiga waxay iyagana leeyihiin*

*guryaha waxaa iska leh Bankiga, laakiin waxaan arrinkaan hor geyn doonaa Insha'Allaah Golaha Wasiirrada oo go'aan ka gaari doonta.*

*Haddaba, ugu dambayntii waxaan la kulmay qaar ka mid ah Wasiirrada magacyadooda iyo xilkoodaba hoos ku xusan, si aan u guddoonsiiyo warbixin waafi ah iyo dokumentiga caddeynaya in Guryahaas ay milkiyaddooda leeyihiin Shaqaalaha deggen. Wasiirrada markaan mid mid ula kulmay oo aan u faahfaahiyey arrinta, waxay giddigood ii ballan qaadeen inay xuquuqda shaqaalaha qaranka u soo halgamay ay daafici doonaan, balse loomaba geynin arrintaan oo iyadana halkaan ayey ku soo gabagaboowday arrinta Guryaha Shaqaalaha.*

*Waxaa Wasiirradaas ka mid ahaa:*

1. *Warbixinta Mudane Axmed Xasan Gaboobe*
   *Wasiirka Beeraha*
   *Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya*
   *Muqdisho – Soomaaliya*

2. *Warbixinta Mudane Cabdiraxmaan Ceynte*
   *Wasiirka Qorsheynta*
   *Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya*
   *Muqdisho – Soomaaliya*

3. *Warbixinta Mudane Cabdulqaadir Dini*
   *Wasiirka Gaashaandhigga*
   *Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya*

*Muqdisho – Soomaaliya*

*4. Warbixinta Mudane Cabdullaahi Axmed Jaamac*
*Wasiirka Caddaaladda*
*Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya*
*Muqdisho – Soomaaliya*

*Waxaa Ilaahay Mahaddiis ah in maalin maalmaha ka mid ah uu arrinteenna ka hor dhawaajiyey Shirka Golaha Shacbiga Xildhibaan Mudane CABDALLA BOOS, annogoo aanan u dacwoonin, balse waxaan kula kulannay Hoteel uu deggenaa, si aan ugu mahad celino abaalkaas uu noo sameeyey, iyadoo intii aan u dacwoonnay aysan naga soo hoos qaadin.*

*Kaddib waxaan la kulannay aniga iyo AUN XASAN CILMI BARKHADLE oo markaas noolaa, balse goor dambe ku geeriyooday Magaalada Nairobi ee Dalka Kenya Xildhibaan Inj. Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamed oo ahaa Guddoomiyaha Guddiga Baarlamaanka ee arrimaha Hawlaha Guud iyo Guryaha iyo Gaadiidka, annagoo u bandhignay arrinta Guryaha Shaqaalaha ee Degmada Wadajir ee Buulo Xuubey, agagaarka Gegida Caalamiga ah ee AUN AADAN CADDE, isla kulankaasna waxaan Guddoomiyaha guddoonsiinnay cabashdeenna oo qoaraal ah iyo buug ay ku kaydsan yihiin dokumentiga caddeynaya in Guryahaas ay Shaqaalaha leeyihiin.*

*Guddoomiyaha Inj Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamed wuxuu noo ballan qaaday inuu dokumentiga darsi doono, isagoo weliba hor dhigi doona Xubnaha Guddigiis ee Baarlamaanka, kaddib dib wadjir ahaan noola kulmi doonno Insha'Allah.*

*Guddoomiye Inj. Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamed arrintaas si sharaf leh ayuu u fuliyey, wuxuuna nagu casumay Hoteel Saxafi Qado Sharaf isaga iyo Xubnaha Guddigiisa, sidaa aad ka arki kartaan sawir hoos kuxusan Insha'Allah:*

*Haddaba, waxaan ka fursan weynay inaan xuquqqdeenna ku raadsanno si SHARCI ah, markaas aan heshiis la galnay Shirkadda magaceeda la yiraahndo*

***"HORN LEGAL CONSULTING SERVICES"***

*taarrikhdu markay ahayd bishii Jannaayo 19-dii 2016 inay noo daafacaan xuquuqdeenna oo isugu jirta ka hortegidda warqadda uu Bankiga noo soo qoray oo ahayd inaan guryaha ka baxno si sharci darro ah iyo milkiyadda hantidaas.*

*Shirar badan kaddib, waxay Qareennada noo sheegeen in 2-da arrin ay kala leeyihiin Maxkamdda Sare ee Dalka iyo Maxkamadda Gobolka Banaadir. Sidaas darteed, waxaa la hormariyey midda Idaariga ah (MAAMULKA), waxaana*

*dacwad loo qaddimay Maxkamadda Sare ee Dalka oo arrintaas ku  shuqul leh, kaddibna Maxkamadda Sare ee Dalka waxay gaarsiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya in Dacwad Idaari ah oo DIB-U-EEGIS laga keenay, wida ku xusan warqadda SUMM:20/2016BG taariikhdu marakay ahayd 10/02/2016. Ugu dambayntiina Maxkamadda Sare ee Dalka waxay muddaysay dacwadii Idaariga oo DIB-U-EEGISTA AHAYD bishii Luulyo 10-dii 2016, saacaddu markay ahayd10:00 aroornimo, sida ku xusan warqadda Maxkamadda Sare ee Dalka Ref:MS/20/2016BG.*

*Qareennadeenna waxay Maxkamadda u qaddimeen dhowr iyo 40 dokumenti oo caddeynaya hantidaas in Shaqaalaha Guryaha deggen ay leeyihiin oo Bankiga xaq u lahayn inuu ka saaro, halka Bankiga Dhexe Garyaqaanka Guud ee Qaranka oo u doodayey uu Maxkamadda keeni waaayey 1(hal) dokumenti oo caddeynaya in hantidaas uu Bankiga leehay.  Sidaas dartee, Maxkamadda Sare ee Dalka waxay xukunka ku ridday Bankiga Dhexe ee Soomaaliya waxayna u u xukuntay Shaqaalaha Guryaha deggen, iyadoo weliba Bankiga lagu xukumay inuu bixiyo kharajka Qareennada ee Shaqaalaha Guryaha deggan uga baxay, sida ku xusan:* ***Go'aanka Maxkamadda Sare ee Dalka ka soo saartay Dacwada Idaariga ah ee uu Mudane Maxamed Xaaji Cali Maxamed ku soo oogay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Ref.MS/20/2016BG iyo Ref.,MS/71/2016BX Tkh. 18/07/2016****.*

*Haddaba waxaa dhacay isla Maxkamaddii Sare ee Dalka oo xukunka kor ku xusan ku ridday Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inay soo gaarsiisay Qareennadeenna inay qaadi doonto dacwad dib-u-eegis ah, arrintaaso aanan sal iyo raad ku lahayn Sharciyada Dalka, maadaama xukunka kor ku xusan uu ku saleysnaa Dacwad Idaari ah oo DIB-U-EEGIS ah. Qareennadeenna arrintaas cabasho qoraal ah ayey ka keeneen oo ay u qaddimeen Maxkamadda Sare ee Dalka, balse nasiib darro waxaa noqday in Maxkamadda aysan jawaab ka soo celinin, laakiinse ay dacwad kale ay qaadday, iyagoo Qareennadeenna la soo gaarsiinin, kaddibna waxay ridday XUKUNKA FAASIDKA AH, sida ku xusan* ***MS/20/2016BG & MS/10/2016BX Tkh. 03/08/2016.***

*Haddaba, Qareennadeenna waxay Dacwad Madani ah ka fureen Maxkamadda Gobolka Banaadir oo arrinta Milkiyadda awood u leh, sida ku xusan warqadda TIXRAAC DMA/11/17 taariikhdu markay ahayd 27-kii Diseembar 2017.*

*Maxkamadda Gobolka Banaadir waxay Dacwadii Madaniga ahayd ay muddeysay taariikhdu markay ahayd Nofeembar 16, 2017 saacaddu markay ahayd 10:00 aroornimo, balse waxaa dhacday in Qareennadeennu ay u hogaansameen amarka Maxkamadda oo taariikhdaas iyo saacaddaasba ay xaadir ku noqdeen qolkii lagu qaadayey*

*dacwada madaniga ah, waxaase nasiib darro noqotay in Garyaqaanka Guud ee Qaranka uusan imaan waqtiga la muddeeyey dacwada, Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa la filawaay noqotay in Maxkamadda Gobolka Banaadir aysan tallaabo ka qaadin Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Qareennadeenna aysan war dambe aysan soo gaarsiinin ilaa iyo hadda oo bishaan Abriile tahay 6, 2023 laakiinse annaga dacwadaas weli wey noo rahman tahay, maadaama aana Maxkamadda Gobolka Banaadir ilaa iyo haatan aysan soo gaarsiinin Qareennadeenna Muddeyn kale. Arrintaasna waxaa marag ma doonto u tahay halka uu Dalkeenna Caddaaladda ka joogo. Waxaa jirta Maahmaah Talyaani ah oo dhaheysa* ***(IL VALORE DI UN POPOLO SI MISURA COL SUO SENSO DI GIUSTIZIA)***

*Iyadoo arrinta halkaas mareyso ayaa waxaa dhacday fal aanan laga sugeynin in Maxkamad ay sameyso oo ah, sida ku xusan Warqadda Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir ee midka haatan jooga ka horreyey inuu soo saaray Warqadda Summad No:ML/3/DML/387//0/17taariikhdu markay ahayd 27-kii Diseembar 2017 isagoo tixraacayo codsi kaga yimid Garyaqaanka Guud ee Qaranka in Dacwadii Madaniga ahayd oo rahmanayd galkeeda la xiray, iyadoo aanan Qareennadeenna lagu soo war gelinin, arrintaasna waxay marag ma doonta u tahay in Maxkamaddii aan u soo dacwoonay ay la safatay jaanibkii la dacweynayey.*

*Waxaa lagama maarmaan ah in la xuso in safarkeygii ugu dambeeyey oo ahaa Jannaayo 23 ilaa iyo Febraayo 22, 2023 ee aan arrimaha Dacwada Madaniga ah soo cusbooneysiiyo, ayaa maalin maalmaha ka mid ah Qado Sharaf ii sameeyey Mudane Maxamed Cabdi Gacma-Cadde oo aan wada deggenaan jirnay Washington DC Metropolitain, kaddib qadada ayaa waxaa soo wacay Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee haatan xilkaas haya Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Cabdullaahi, markaas ayuu Mudane Maxamed Cabdi i weydiiyey inaan aqoon u leeyahay Guddoomiyaha, balse waxaan u sheegay inaan aqoon shakhsi ah aanan u lahayn, kaddib ayuu iga soo jeediyey inuu i soo baro, aniguna waan ka oggolaaday.*

*Markaan Xarunta Bankiga Dhexe aa soo galnay ayaa Shaqaalaha Bankiga iyo xitaa askartii gaarka ka haysay Guddoomiyaha ay igu soo yaaceen oo ay u sheegeen Guddoomiyaha qofka aan ahay iyo xilalka aan Bankiga Dhexe ka soo qabtay ilaa iyo 1966-2013. Kaddib markaa araa' is-dhaafsannay ayuu wax iga weydiiyey Milkiyadda Guryaha Shaqaalaha ee Degmada Wadajir, aniguna waxaan siiyey warbixin kooban ilaa iyo in Maxkamadda Sare ee Dalka u Xukuntay Shaqaalaha, isaguna wuxuu ii sheegay in loo sheegay in Guryaha uu leeyahay Bankiga, isla markaasna uusan haysanin Xukunkaas Maxkamadda Sare ee Dalka. Intaas wuxuu iigu daray in uu hayo*

*dokumenti guryahaas iyo dhulkaba la kireeyey PRIEMIER BANK muddo 30 sano ah, aniguna waxaan la socodsiiyey inaan arrintaas la soconin. Waxa aan la yaabay eray uu Guddoomiyaha igu yiri oo ahaa, waan la socdaa inaad dhow jeer istiqaalo aad ka keentay xilkii aad Bankiga Dhexe u haysay, oo aad ka dhowrsatay sharaftaada arrimo teknical ah awgeed, aniguna waxaan rajeynayaa inaan waddadaas oo kale raaco Insha'Allah. Warkaas aad iyo aad ayaan ugu farxay inuu Guddoomiyaha sidaas ula socdo mowqifkeyga.*

*Maalmo kaddib waxaa dhacday in Guddoomiye Ku-Xigeenka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Mudane Cali Yaasiin Wardheer inuu xafiiskiisa Bankiga ugu yeeray Shaqaalahii degganaa Guryaha Degmada Wadajir ee Buulo Xuubey uuna ku amray inay guryaha ka baxaan ugu dambayntii taariikhdu markay tahay Maarso 23, 2023 (**EEG CODKA SIRTA AH EE GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA LAGA DUUBAY IYO FIKRADIHII AY IS-DHAAFSADEEN SHAQAALIHII DEGGANAA GURYAHAA),***

*Iyadoo aan si tifaftiran aan uga soo hadlay taariikhaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Shaqaalaha Bankiga Dhexe iyo Guryaha Shaqaalaha ee Degmada Wadajir ee Buulo Xuubey ayaa waxaa dhacday in Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir Mudane Saalax Cali Maxamuud uu amar ku siiyey Boolikska Soomaaliyeed inay Shaqaalaha Guryahooda deggan xoog looga saaro, sida ku*

*xusan warqaddiisa SUM:MGB/XG/28/2023 TKH. 21/02/2023 oo weliba argagixis loogu duray dumarkii iyo carruurtii, iyadoo Maalintii Isniinta ee Bisha Maarso ahayd 13, 2023 aroortii booliis iyo dabbaabaad iyo cagaf-cagafyo la dul keenay oo si waxash-nimo alaaabtoodii dibedda loogu soo tuurtuuray, guryahoodii lagu bilaabay dumis oo dhulka la dhiga hantidii ma-guurtada ahayd oo halkaas ku dhisnayd tan iyo 1966.*

*Qareennadeenna waxay la hadleen Guddoomiyahaas amarka bixiyey, balse wuxuu ugu jawaabay inuusan haysanin xukunka Maxkamadda Sare ee Dalka ka gaartay guryahaas, wuxuuna ballamiyey maalintii xitay. Markii ay Qareennadeenna la kulmeen Guddoomiyahaas oo ay u geeyeeen nuqulka Xukunka Maxkamadda Sare ee Dalka TIXRAA* ***Ref.MS/20/2016BG iyo Ref.,MS/71/2016BX Tkh. 18/07/2016****. Intii Guddoomiya Maxkamadda Gobolka Banaadir uu sixi lahaa khaladka uu galay wuuba ku sii adkeystay go'aankiisa. Sidaas darteed, Qareennadeenna waxay cabasho qoraal ah gaarsiiyeen Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka, iyagoo oo si tifaftiran xog ogaal uga dhigay caddaalad darrada lagu sameeyey Shaqaalaha Guryaha  xaqa u leh oo ay horeyba Maxkamadda Sare ee Dalka ugu xukuntay, balse isagana ilaa iyo maanta oo bishaan Maajo tahay 13, 2023 weli jawaab kama uusan siinin Qarennadeenna. Isku soo*

*duuduub, waxaa si qayaxa u cad in Dalka uusan ka jirin Caddaalad.*

## ***10.MASJID AL-RAXMAAN***

*Waxaa wax lala yaaba ah in Masjid Al-Raxmaan oo ku dhex yaalla Xaafadda Bangaariyo ee Buulo Xuubey oo sida aad ka arki kartaan sawirrada hoos ku xusan siduu u camirnaa oo hadda falkaas xun lagu dabbaqay oo la xiray, iyadoo korontadii iyo biyihiiba la gooyey, kaddib markii Culumada Masjidka ay u tageen Taliska NISA oo haatan Xaafadda Bangaariyo ku sugan, waxaa loogu jawaabay soo doonta alaabta Masjidka idiin dhex taalla. Haddaba, waxaa is-weydiin leh Masjidka waxaa yaalla Kutubta Qur'aanka Kariimka ah oo aannu ka keennay Dalka UAE, iyadoo aan Masaajidyo kale oo aanan fursaddaas heli aan in ka badan 200 kartoon aan ka siinnay iyo Kutubta Marjica ah ee Axaadiista ah, intaba waa WAQAF oo cid leh ma laha, sidaas darteed Culumada Masjidka dib uguma noqonin askarta NISA oo halkaas ku sugan.*









*Sida kor ku xusan Masjidka sida uu u camirnaa iyo vidio-yahaan hoos ku tilmaaman sida loo dumiyey Nuurkii Masjikaas ka baxayey iyo mugdiga haatan ka muuqdo. Faahfaahin dheeri inaan ka sameeyo la iigama baahna Insha'Allah.*



*Haddaba, gabagabadii, waxaan uga digeynaa ciddii dooneysa inay iibsato Guryaha Shaqaalaha Degmada Wadajir ee Buulo Xuubey, agagaarka Gegida Caalamiga ah AUN AADAN CADDE inaysan ku hungoobin, maxaa yeelay Hantidaas Ma-Guurtada ah waxaa iska leh Shaqaalaha Guryahaas deggan, sida go'aanka Xukunka Maxkamadda Sare ee Dalka.*

*Annaga oo ah hantiilayaasha hantidaas, waxaan u taagan nahay inaan daafacanno xuquuqdeenna meel kasta ay nala gaarto, xitaa Maxkamado Caalami ah, maadaama uu Dalkeenna ka jirin Maxkamado Caadil ah, balse ay u janjeeraan Caddaalad Darro, sida ku qeexan qoraalkaan oo cid kasta oo arrintaan dhex-dhexaad ka ah ay ka bogan karto.*

*Hay'adda aan dacweyneyno waa BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA ee ma aha shakhsiyaal iyo Dawlad, maxaa yeelay xuquuqdaan waxaa isku dayey marar badan waa Bankiga in ay duudsiyaan, balse way u suurto geli weydayuma suurto geli weyday Sharci ahaan. Dacwaddeennana waxay ku saleysan tahay sida soo socota Insha'Allah:*

- *A) Guryaheenna in dib laynagu soo celiyo milkiyaddooda.*
- *B) Hantidii nalaga burburiyey si JOWR AH (ABBUSE OF POWER) in dib laynoogu dhiso.*

- *C) Dumarkii iyo Carruurtii argagixisada loo geystay maalintii Isniinta ahayd ee bisha Maaro 13, 2023 mag-dhaw la siiyo, maadaama caafimaadkooda waxyeello loo geystay.*
- *D) Xuquuqdii aan ku yeelannay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo aan u soo shaqeynay muddo 30 sano ah inuu na siiyo, sida ku xusan Heshiisyada uu Bankigu nala saxiixday, markaan shaqada bilaabeynay.*
- *Inuu noo soo celiyo kharajyada nooga baxay Qareennada difaacayey ilaa iyo haatanna difaacaya xuquuqdeennaas, sida ay Maxkamadda Sare horey ugu xukuntay Bankiga taariikhdu markay ahay Luulyo 18, 2016.*

*Wa Billaahi Towfiiq.*

*Maxamed Xaaji Cali Maxamed*

*e-mail : mohamed_haji1@yahoo.com*

*Wakiilka Sharciga ah ee 52-da Qoys oo xaqa u leh hantidaas kor ku xusan*

*Charlotte, NC USA*

*Sunday, May 14, 2023*